CUNFI (WAXYEELAYN) IYO SILCIN

XUQUUQDAADA – TALOOYIN LA TAABAN KARO IYO TILMAAMO

WAA MAXAY CUNFIGU (WAXYEELAYNTU)?

Mararka qaarkood waxa adkaan kara in la garto waxa uu yahay cunfigu (waxyeelayntu).

Cunfiga ama wax yeelada (dilmada) jidhku waa ka markiiba loo maleeyo. Waxyeelada jidhku waxbay xanuunjisaa, waxayna keeni kartaa nabaro iyo dhaawacyo jidhka ah. Dhaawaca jidhku wuxuu tusaale ahaan noqon karaa nabar, laad, riixis iyo mindi ku dhufasho.

Waxyeelada nafsaddu waa tan keenta in nafsad ahaan dhib lagu gaarsiiyo. Waxyeelada nafsad ahaani waa tan keenta inaad murugooto, baqato ama kaa caraysiiya. Wayeelada nafsaddu waxay noqon kartaa go'doomin, hanjabaad, ilaalin, meel ka dhac ama guur khasab ah.

Waxyeelo (xad-gudub) jinsi waa galmo aanad rabin. Waa xad-gudub (waxyeelo) jinsi ah haba noqdo ninkaaga oo kugu khasba galmo aanad rabin adigoo maya yiri. Xad-gudub jinsi waxa loogu yeeraa kufsi.

Xadgudub (waxyeelo) dhaqaale wuxuu noqon karaa qof kale oo kontoroola dhaqaalahaaga, sida in lacagtaada lagaa hayo oo laguu diido, ama shahaadadaada iyo dokumentiyadaada lagaa xado.

Waxyeelo hanti waxay noqon kartaa waxa cadho (caro) lagu burburiyo, albaabada iyo alaabta guriga oo la laado, taasoo looga jeedo hanjabaad, gacan ku hayn ama in lagu baqa geliyo.

Noocyadan waxyeelada (cunfiga) ah oo dhami waa sharci darro. Cunfigu wuxuu ka iman karaa dadka wada nool, reerka ninka ama gabarta, caruurta, walaasha ama walaalka. Qoraalada hoos ku qoran waxaanu ku gorfayn (tilmaami) doonaa xuquuqda ku wajahan haddii cidi waxyeelo kuu gaysato.

XUQUUQDAADA

Booliisku wuxuu kaa caawin karaa

- Jeleska/gambaleelka khatarta: Markaad taabato, markiiba booliisku wuxuu oganayaa inaad khatar ku sugan tahay.
- Booqasho ka mamnuucis: qofka cunfiga iyo dhibta kugu haya looma ogola inuu kula soo xiriiro

XARUNTA DHIBANAYAASHA (KRISE SENTERET) WUXUU KAA CAAWIN KARAA

- **Xarun maalmeed:** halkan waxaa laguugu deeqi karaa waraysi, talo, hagis iyo inaad kooras qaadato iyo inaad ka mid noqoto kooxo si ay naftooda u caawiyaan. Xafiiskadhibanayaasha waxaad ka heleysaa qareen/looyar iyo sheekaysi bulsho. Caruurta goob joogga ka ahaa dagaal iyo cunfi waxay halkan ka heli karaan cid dhibtooda kala hadasha.
- Xarun hoyasho: halkan waad seexan kartaa, haddii aanad nabad ku dareemayn gurigaaga. Haddii aad caruur haysato, xaruntan gargaarka waad u soo kaxaysan kartaa.

Degenaansho

Haddaad xaas tahay oo ama ninkaaga ama haweenaydaadu cunfi iyo dagaal kugu hayso ama caruurta lagu hayo, adiga iyo caruurtuba Noorway degenaansho waa lagaa siin karaa, haddii aad is furtaan. Deganaansho waa lagu siin karaa xitaa haddii aad Noorway degenayd in ka yar 3 sano.

Haddaad codsanaysid inaad Noorway sii degenaato, waa inaad booliiska arinkaa u sharaxdaa. Waa muhiim inaad sheegto wixii dhacay oo dhan. Booliisku wuxuu ogaan rabaa cunfiga iyo dhibtii dhacday oo bal-ballaadhan. Wuxuu rabaa inuu ogaado, goortay dhacday, siday u dhacday, soo noq-noqoshaddisa. Xassusnow inaad qortid mar kasta oo cunfi iyo xadgudub laguu gaysto.

Way fiican tahay haddaad caddayn ka hayso cunfiga/dagaalka dhacay. Caddayntani waxay noqon kartaa caddayn dhakhtar, dhakhtar cilmi nafsi, la taliye, macalin, xarunta dhibanayaasha (krise senter). Dadkani waxaad u isticmaali kartaa markhaati kiiska maxkamadda. Khasab maaha inaad ashkato booliiska ugu gudbisid si aad codsi deganaansho madax banaan u dalbato.

Deganaansho Noorway waa lagaa siin karaa xaalad banii aadamnimo oo tixgelin mudan awgeed ama ku xirnaansho xeeldheer oo Noorway aad ku leedahay awgeed.haddaad u baahato warbixin dheeraada la xiriir JURK.

Waxyeelada Magdhawgeeda

Haddii waxyeelo lagu gaarsiiyay, waxaad magdhaw ka codsan kartaa xafiiska magdhawga cunfiga (waxyeelada) . Arinkani waxaa la yiraahdaa magdhawga waxyeelada. Haddii cidi cunfi (waxyeelo) kugula kacday adiga ama caruurtaada ama caruurtaadu argatay cid reerka ka tirsan oo dagaal/dilmo cid kale kula kacaysa, waxaad codsan kartaa magdhaw waxyeelo. Si aad u codsato magdhaw waxyeelo cunfi, waa inaad booliiska ashakato u gudbisaa. Waa inaad booliiska u sheegto inaad magdhaw ka rabto qofka ku hujuumay.

La xiriir JURK, haddaad rabto inaad in kale ka ogaatid magdhawga waxyeelada/dilmada.

Looyar caawimo

Haddaad la kulantay xoogis jinsi ama dagaal/waxyeelo faamligaaga ah, waxaad xaq u leedahay inaad hesho looyar ku caawiya. Caawimo looyar waxa kaloo qofka la siiyaa haddii khatarnimada xaaladdu keensato. Maxkamadaha ayaa bixiya kharshka looyarka caawimada.

- Ugu horayn maxkamddu waxay kharashka looyarka caawimada bixisaa 3 saacadood, si uu u helo inay tahay inaad ashakato gudbiso.
- Haddaad ashkato gudbinaysid, looyarku booliiska ayuu kuu raacayaa.
- Looyarku wuu ku caawinayaa inta baadhitaanka arinkani socdo oo dhan. Tusaale ahaan wuxuu kuu sharaxayaa halka kiiskaagu marayo, wuxuu akhriyayaa dokumentiyada booliiska, ka codsanayaa booliisku inuu markhaatiyo waraysto, caddaymaha la xafido. Saacadaha uu looyarku isticmaalo ee kiiskaaga u muhiimka ah, waxaa bixinaya maxkamadda.
- Looyarka caawimadu wuxuu kaa caawin karaa inaad magdhaw codsato.
- Haddii kiiskaaga la laalo, looyarku wuxuu looyarka dawladda u diri karaa abiil.
- Looyarka caawimadu maxkamadda wuu kuu raacayaa.

Caawimo looyar oo bilaash ah

Caawimo looyar oo bilaash ah macnaheedu waa inaadan u baahnayn inaad bixiso lacagta looyarka. Waa inaad codsato inaad hesho looyar bilaash ah.



NAV

Waxaad heli kartaa lacagta xanuunka ama lacagta shaqo ku sugista. Lacagta xanuunku waxay bedelaysaa marka qofka shaqaynaya lacagtii shaqadu ka joogsato sabab xanuun ama dhaawac awgeed. Lacagta shaqo ku sugista waxaad NAV ka heleysaa, intaad xaawilayso inaad shaqada ku soo laabatid kadib xanuun ama dhaawac ku gaaray.

Waxa kale oo aad heli kartaa adeeg cayreed oo noqon kara, adeeg degenaansho gaaban, caawimo dhaqaaleed oo kirada guriga ah(bostøtte) iyo kharsh nololeed. Haddaad rabto inaad la xiriirto NAV waa inaad diyaarsato dokumentiyada muhiimka ah, caddayn dhakhtar. Warbixin intaa ka dheeraada la xiriir NAV.

CAYMIS

Haddii waxyeelo (cunfi) laguu geysto, waxaa haboon inaad baartid in aad leedahay caymis arinkaa magdhabaya (daboolaya)

WAA MAXAY CAAQIBADA HADDII AAD ASHKATO GUDBISO AMA AANAD ASHKATO GUDBIN

Ashkatadu waa fariin booliiska loo gudbinayo oo khusaysa dembi ciqaab waajibsanaya.

- Booliiska waxaa ku waajiba sir qarin. Taa macnaheedu waxaa weeye in wixii aad booliiska gadhsiisaa ay tahay qarsoodi labadiina idinka dhaxaysa. Markaad booliiska la kulanto waxaad fariisanaysaan qol gaar ah oo uu kaa qorayo waxa ugu muhiimsan kiiskaaga. Booliisku wuxuu kulanka dhexdiisa qaadayaa maqal ama muuqaal.

- Haddaad ashkato gudbiso, waxa booliisku bilaabi karaa baadhitaan. Ruuxa kugula kacay dilmo ama waxyeelayn kale wuxuu waajibsan karaa ciqaab lacageed ama xadhig.

- Booliisku wuxuu ku siin karaa jeleska ama gambaleelka khatarta. Waxa kaloo ay ka mamnuuci karaan cidda ku waxyeelaynaysaa inay kuu soo dhawaadaan.

- Xarunta gargaarka dhibanayaashu waxay idinku caawin kartaa talo iyo hagis haddaad rabtaan inaad ashkato gudbisaan.

- Haddaad ashkatayso waxaad heli kartaa magdhaw.

TALOOYIN KU SAABSAN ASHKATADA – TILMAAN IYO TALO

- Isku day inaad xafiddo caddaynta. Sawir ka qaad dhaawacyada, xafid fariinta mobiilka, emaylka, waraaqaha iyo wixii lamida.

- Haddii lagugula kaco xoogis jinsi, ha iska dhiqin (maydhin), maryahana ha tuurin

- La xidhiidh gargaarka degdega ah (legevakten) ama qaabilaadda kufsiga si ay kuu baaraan.

- Qor warbixin ku saabsan waxyeelada ku gaartay. Maxaa ku gaaray, goormay dhacday waxyeeladu. Taasu waxay fududaynaysaa inaad booliiska u sharaxdo waxa dhacay

- Uga waran arinkan cid aad ku kalsoon tahay. Tusaale ahaan, macalin, tala bixiye, saaxiib. Qofkaasu wuxuu noqon karaa caddayn ama markhaati ama wuu ku caawin karaa.

- La xiriir dhakhtar ama dhakhtar nafsi. Waxay caddayn karaan in waxyeelo laguu gaystay.

- U sheeg booliiska. Waa muhiim inaad booliiska u sheegto wax kasta, si faah-faahsan ugu sheeg meesha, sida iyo waxyeelada dhacday.

HALKEEBAAD CAAWIMO KA HELI KARTAA?

Dhakhtarka ama xarunta caafimaadka ee xaafadda

Gargaarka degdegga ah - legevakt

Qaabilaadda kufsiga - voldtektsmottaket

Ilaalada adeegga bulshada - sosialvakttjeneste

Xarunta dhibanayaasha - Krisesenter lokalt , www.krisesenter.no
Politiet: tlf: 02800
Telefoonka digniinta ee caruurta iyo dhalinta - Alarmtelefon for barn og unge
tlf: 116 111
NAV, www.nav.no
Xaafadaada ama komuunkaaga - Din bydel eller kommune
Daryeelka dadka waaweyn - vern for eldre tlf: 800 30 196

Telefoonka caawimada dadka dembiyada loo gaystay - Støttetelefon for kriminalitetsofre: tlf: 800 40 008

Xafiiska la taliya dhibanayaasha dembiyada loo geystay - Rådgivningskontoret for kriminalitetsofre tlf: 815 20 077
JURK, www.jurk.no tlf: 228 42 950
Laanqayrta cas - Røde Kors, www.rodekors.no tlf: 05003
DIXI, www.dixi.no tlf: 224 44 050
Mira senteret , www.mirasenteret.no tlf:221 16 920

Caawimada dadka faraxumaynta jinsiga ah ee reerka dhexdiisa loogu gaystay - Støttesenter mot incest, www.sentermotincest.no tlf:233 14 650

Looyarka caawimada: la xiriir maxkamadda. Iyagaa yaqaana looyarada caawimada ee xarfaanta ah.

Xarumaha caawimada sida xarunta dhibanayaasha (krisesenter) iyo DIXI waxay hayaan liis ay ku qoran yihiin looyarada fiicfiican. Xarunta booliskuna waxay hayaan looyarada caawimada ee gobolka. Waxa kaloo laga heli karaa looyarada caawimada haddii laga baaro www.advokatenhjelperdeg.no www.advokatenhjelperdeg.no gobolka ama degmada aad degen tahay.